# FAAFINTA RASMIGA

# الجريدة الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMALIYA

الجمهورية الصومال الدمقراطية

Sannadka 11aad Muqdisho 25 Maarso 1983 L. 1r3

FAAHFAAHIN BIL SOO BAXA جريده شهرية

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.

QIIMADU waa 5 Shiin lambar waliba—RUKUNKA: Sannadii waa Shs. 100 Somaliya gudaheeda—dibaddeedana waa Shs. 300. Ruknka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Janayo Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo waxoo ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanka waxaa a weydiistaa laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah—lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

## KOOBNIIN

QAYBTA KOOWAAD

SHARCI

W. M.

QAYBTA LABAAD

XEER


XEER SHARCI L. 2 ee 18 Maarso 1983, Joojinta Qaadka. Bogga 136

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 8 ee 17 Maarso 1983, Kordhin muddo Cafis. » 139


QAYBTA SADDEXAAD


MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 3.3.83, Lumid Jeeg War. L. 298661 ku qoran Maxamed Ibraahim Wacays L. 60 » 140

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 6.9.82, Lumid Jeeg War. L. 295867 ku qoran Ibraahim Cali Cumar L. 61 » 141

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 9.3.83, Lumid Buug Kayd L. 5182 ku qoran Madiina Sh. Cumar L. 62 » 142


Madbacadda Qaranka

MAXKAMADDA GOBOLKA MUDUG, 12.3.83, Lumid Buug Kayd L. 67 ku qoran Yaasiin Shariif Xasan L. 63 » **143**

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, /16.3.83, Lumid Jeeg War. L.531676 ku qoran Maxamed Ibraahim X. Cali L.64 » 144

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 20.3.83, Lumid Jeeg War. L. 332591 ku qoran Macallim Nuur Maxamed L. 65 » 145

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 16.3.83, Lumid Jeeg War. L. 499833 ku qoran Axmed Cusmaan Nuur L. 66 » 146

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 16.3.83 Lumid Jeeg War. L. 499832 ku qoran Axmed Cusmaan Nuur L. 67 » 147

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 16.3.83, Lumid Jeeg War. L. 49985 ku qoran Axmed Cusmaan Nuur L. 68 » 148

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 16.3.83, Lumid Jeeg War L. 499836 ku qoran Axmed Cusmaan Nuur L. 69 » 149

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 3.2.83, Lumid J. Wareega L. 025466 ku qoran Maxamed Cabdi Cabdulle L. 69/bis » 150

WARSHADDA KIIMIKADA SOO/YEED (BAYL) 21.2.83, Ogeysiis Shir Saamiley L.70 » 151

WARSHADDA SAABUUNTA QUBEYSKA IYO MARISKA, 21.2.83, Ogeysiis Shir Saamiley L. 71 » 152

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 19.3.83 Lumid Buug Kayd L. 875/83, ku qoran Maxamed Shariif Xasan L.72 » 153

MAXKAMADDA G. SH. HOOSE, 21.2.83, Lumid Buug Kayd L. 712/7 ku qoran Muslima Macallin Xasan L. 73 » 154

QAYBTA LABAAD

XEER SHARCI

XEER — SHARCI L. 2 ee 15 Maarso 1983,

Joojinta Qaadka.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Qodobka 69 ee Dastuurka J.D.S;

ISAGOO ARKAY (Aqoonsaday): In Qaadka Adduunka looga aqoonsan yahay mukhaadaraadka si tartiib ah mujtamaca wax yeello ballaaran u geysta;

ISAGOO GARAWSADAY: Inay waajib tahay wax ka qabashada wax yaabaha dhibaato u geysta Caafimaadka, Dhaqaalaha, Anshaxa iyo Qoyska Ummadda Soomaaliyeed;

ISAGOO ARKAY: In joojinta Qaadka ay leedahay xaalad deg deg ah;

ISAGOO DOEGEYSTAY: Golaha Kasiirada:-

WUXUU XEERIYEY

Qod. 1aad

Laga billaabo dhaqangalka xeer-sharcigan waa la mamnuucay in Qaad dibadda looga soo dejiyo Dalka J.D.S.

Qod. 2aad

Qofkasta ee Qaad dalka J.D.S. dibedda ka soo geliya, soo qaada ama ka qayb qaata falalka noocaas ah waxaa lagu ciqaabayaa:-

— Laba ilaa Shan sannadood oo xabsi ah iyo ganaax u dhaxeeya So.Shs. 10.000/= ilaa 50.000/=.

— Sigan ilaa toban sannadood oo xabsi ah iyo ganaax u dhaxeeya Sh.So. 50.000/= ilaa 100.000/=, haddii qofka dembiga noocaas ah horay u galay.

— Qaadka oo la gubo iyo gaadiidka loo isticmaalay qaadidda qaadka oo lala wareego.

Qod. 3aad

Beeraha Dalka gudihiisa ee qaadku ku beeran ya hay dadka lihi waa inay ku baabi'iyaan muddo laba sano ku eg (31.3.85) kuna beddelaan beer cunno.

Haddii qofkaasi sidaasi yeeli waayo beerta waa la gubayaa, asagana waxaa la saarayaa ganaax u dhexeeya Sh. So. 10.000/= ilaa 50.000/=.

Qod. 4aad

Laga billaabo dhaqangalka xeer-sharcigan waa mamnuuc in qaad cusub dalka gudihiisa lagu beero, qofkii beerana waxaa la saarayaa ganaax u dhexeeya Sh.So. 5.000/= ilaa 25.000/=.

Qod. 5aad

Qofka u xilsaaran ilaalinta iyo dhaqangalka sharcigan ee suuragal ka dhiga ama fududeeya in qaad dalka la soo geliyo, laga beero ama uu ku beernaado, wuxuu mutaysanayaa ciqaabaha qodobada sare ku xusan oo laba laab ah.

Qod. 6aad

Ciddii soo qabata ama kaalin ka qaadata dabar goynta dambiyada sharcigani sheegaya waxaa la sii nayaa abaalgud dhan 30% ganaaxa lagu xukumay dambiilaha (Sh.So. 5.000/= ilaa 20.000/=).

Qod. 7aad

Qaadista dacwadaha la xiriira dambiyada sharcigaani dhigayo waxaa awood u leh Maxkamadda Badbaadada Dalka.

Qod. 8aad

Xeer-sharcigaani wuxuu dhaqangelayaa markii uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. waana in loo gudbiyaa Golaha Shacbiga si uu u raasmiyeeyo.

Muqdisho, 18 Maarso 1983

MADAXWEYNAHA JDS

(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

XEERKA MADAXWEYNAHA JDS lambar 8 taariikh 17 Maarso 1983, Kordhin muddo Cafis.

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Qodobbada 144 iyo 149 ee Xeerka Soomaaliyeed;

MARKUU ARKAY: Xeerka Madaxweynaha JDS lambar C/S01/83, taariikh 12.2.1983, ee Cafiska loogu fidiyey dadka Dalka Soomaaliyeed ka galay dembi heer Qaran ah ee ku sugan Dalka dibaddiisa ama gudahiisa, ha ahaadeen kuwo xukuman ama loo hayo dembi, iyadoo loo eegi doono, hadwalba muddnaan naxariiseed iyo culeys dembi;

MARKUU TIXGELIYEY: Downa ay u muuqatay in la kordhiyo muddadii cafiska si fursad hor leh loo siiyo intii waqtigu uu ku simi waayay in ay ka faa'iideystaan;

WUXUU GO'AAMIYEY

Qod. 1aad

Waxaa la kordhiyay muddadii soddonka maalmood ahayd ee lagu xiray ka faa'iideysiga Cafiskii loo fidiyay dadka Dalka ka galay dembiyada heerka Qaran ah, kuna ekeyd 13ka Maarso 1983, waxaana lagu daray hal bil oo kale, oo ka billaabata 14ka Maarso 1983.

Qod. 2aad

Marka laga reebo muddo kordhinta kor ku tilmaaman, qodobbada kale ee Xeerka Tirsigiisu yahay C/S.01/83, taariikh 12.2.1983, sidoodii ayay u taagnaanayaan.

Qod. 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa laga billaabo 14.3.1983, waxaana lagu soo saarayaa FAAFINTA RASMIGA AH EE JAMHUURIYADDA.

Muqdisho, 17 Mar. 1983

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamad Siyaad Barre)

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Jeeg dhumay oo lambarkiisu ahaa 298661 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Labaad, kuna qorneyd lacag dhan Sh. So. 3.000/= uu iska lahaa Maxamed Ibraahim Wac. sida ku cad warqadda lam 001726 taariikh 3.3.83 oo Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta XIS-GUUD;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) J. Wareegga lam. 298661 oo ku qoran magaca Maxamed Ibraahim Wacays ayna ku jirto lacag dhan Sh. So. 3.000/=

WUXDU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo keydka laanta Labaad u beddelo Jeegga Wareegga buugga keydka, ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta go,aanka lagu daabaco faafinta rasmoga ah ee Jamhuriyadda demoqradiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horeysa aan ishortaag laga keenin.

Muqdisho, 3.3.83.

Gudoomiyaha Maxk. Bobol. Benaadir

Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 60

MAXKAMADDA GOBOLKA MUDUG

GUDDOOMIYAHA MGM

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo Qortay Jaalle Ibraaaahin Cali Cumar oo uu ku Caddeeyey in uu ka LumaJeeg Wareega Lr. 295867 ee 21.2.1982 kuna Qaran tahay Lacag Dhan Sh.S.3.000(Saddexkun) Shilin, Uuna ka qaatay Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta Gaalkacyo;

HADDUU ARKAY: Xaashida Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta Gaalkacayo Taariikhda 2.9.1982. oo lagu Caddeyey in Arrintaasi jirto;

HADUU ARKAY: Qod.69.D-L.9.9.1965 N.2

Waxaa u Caddaatay in uu lumay Jeegga kor ku xusan, kor ku xusan, ka dib markii lagu Joro Faafinta Rarmiga ah ee Dawladda kana soo wareegto muddo 30 Maalmood ah.

Wuxuuna Amrayaa oo kale haddii aan qof kale la Sheegan in Jeegga Cusub Gacanta laga Saaaro Jeellahaas amase Cid Wakaalad Sharci ah ka sidata ka Dib Markii Muddadaas 30 Maalmood ah la suga.

Gaalkacyo 6.9.1982.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA

SH.Cabdullaahi Hilowle

L. 61

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: in Buug Kayd Dhumay oo lambarkiisu ahaa 5182 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Koowaad kuna qorreyd lacag dhan Sh. So. 23.437,49/= uu iska lahaa Madiina Sh Cumar sida ku cad warqadda lam. ———————— taariikh 8.3.83 oo Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed, Laanta Koowaad;

HADDUU ARKAY: Qod.69 Sharciga lam.2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kayd lam. 5182 oo ku qoran magaca Madiina Sh. Cumar ayna ku jirto lacag dhan Sh. So. 23.437.49/=.

WUXDU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Koowaad u beddelo Madiina Sh. Cumar Buugga Keydka, ee kor ku tilmaaman una sameyso mid la mid ah ka dib markay ka soo wareetgo muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horreysa aan is-hortaag laga keenin.

Muqdisho, 9.3.83

GUDDOOMIYAHA MGB

(Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax)

L. 62

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Buug Kayd dhumay oo lambarkiisu ahaa 67 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta W/Dhiiglay kuna qorneyd lacag dhan Sh. So. 15.000/= uu iska lahaa Yaasiin Shariif Xasan sida ku cad warqadda lam. 0043 taariikh ———————— oo Bankiga Ganacsiga iyo Beydka Soomaaliyeed Laanta W/DHIGLAY;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga lam.2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buugga Keydka lam. 67 oo ku qoran magaca Yaasiin Shariif Xasan ayna ku jirto lacag dhan Sh. So. 15.000/=.

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta W/Dhiiglay, u beddelo Yaasiin Shariif Xasan Buugga Kaydka, ee kor ku tilmaaman una sameyso mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 30 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JamhuuriyaddaDimoqraadiga Soomaalihayo dembi, iyadoo loo eegi doono, hadwalba, mudnaan yeed, haddii inta ka horreysa aan is-hortaag laga keenin.

Muqdisho, 12.3.83

GUDDOOMIYAHA MGB

(Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax)

L. 63

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU AKHRIYAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU HUBISADAY: In Jeeg War. dhumay oo lambarkiisu ahaa 531676 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta X.GUUD kuna qorneyd lacag dhan Sh. So. 50.000 uu iska lahaa Maxamed Ibraahim X. Cali sida ku cad warqadda lam. 002033 Taariikh 12.3.83 oo Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta 2aad.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga lam.2 ee 9.9.6g.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg W. Lam. 531676 oo ku qoran magaca Maxamed Ibraahim X. Cali ayna ku jirto Sh. So. 50.000/=.

WUXDU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta 2aad u beddelo Jeeg Wareegga ee kor ku tilmaaman una sameyso mid la mid ah qa dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horreysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho, 16.3.83

GUDDOOMIYAHA MGB

(Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax)

L. 44

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In J. W. dhumay oo lambarkiisu ahaa 332591 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Koowaad kuna qornayd lacag dhan Sh. So. 10.000/= uu iska lahaa Macallin Nuur Maxamed sida ku cad warqadda lam. 2382 taariikh 20.1.83 oo Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Koowaad;

HADDUU ARKAY: Qod.69 Sharciga lam.2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) J. Wareegga lam. 332591 oo ku qoran magaca Macallin Nuur Maxamed ayna ku jirto lacag dhan Sh. So. 10.000/=.

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta Woo-waad u beddelo J. WAREEGGA ee kor ku tilmaaman una sameyso mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegho muddo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horreysa aan is-hortaag laga keenin.

Muqdisho, 20.1.83

GUDDOOMIYAHA MGB

(Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax)

L. 65

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Jeeg W. dhumay oo lambarkiisu ahaa 299833 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Hargeysa kuna qorneyd lacag dhan Sh. So. 50.000/= uu iska lahaa Axmed Cusmaan Nuur sida ku cad warqadda lam. 002167 taariikh 15.3.83 oo Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Hargeysa;

HADDUU ARKAY: Qod.69 Sharciga lam.2 ee 9.9-65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Wareega lam. 499833 oo ku qoran magaca Axmed Cusmaan Nuur ayna ku jirto lacag dhan Sh. So. 50.000/=.

WUXDU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Hargeysa u beddelo Jeegga Wareega ee kor ku tilmaaman una sameyso mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horreysa aan is-hortaag laga keenin.

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax)

Muqdisho, 16.3.83

L. 66

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Jeeg Wareega dhumay oo lambarkiisu ahaa499834 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Hargeysa kuna qorneyd lacag dhan Sh. So. 50.000/= uu iska lahaa Axmed Cusmaan Nuur sida ku cad warqadda lam. 002167 tuuriikh 15.3.83 oo Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Hargeysa;

HADDUU ARKAY: Qod.69 Sharciga lam.2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg Wareega lam. 499834 oo ku qoran magaca Axmed Cusmaan Nuur ayna ku jirto lacag dhan 50.000/=.

WUXDU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta Hargeysa u beddelo Jeeg Wareega ee kor ku tilmaaman una sameyso mid la mid ah ka dib markey ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horreysa aan is-hortaag laga keenin.

Muqdisho, 16.3.83

GUDDOOMIYAHA MGB

(Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax)

L. 67

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU AKHRIYAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU HUBSADAY: In Jeeg Wareeg dhumay oo lambarkiisu ahaa 499835 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Hargeysa kuna qorneyd lacag dhan Sh. So. 50.000 uu iska lahaa Axmed Cusmaan Nuur sida ku cad warqadda lam. 002167 Taariikh 15.3.83 oo Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Hargeysa;

HADDUU ARKAY: Qod-69 Sharciga lam.2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg Wareeg lam. 499835 oo ku qoran magaca Axmed Cusmaan Nuur ayna ku jirto Sh. So. 50.000=/.

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta Hargeysa u beddelo Jeeg Wareega ee kor ku tilmaaman una sameyso mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 15 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horeysa aan is-hortaag laga keenin.

Muqdisho, 15.3.83

GUDDOOMIYAHA MGB

(Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax)

L. 68

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU AKHRIYEY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU HUBSADAY: In Jeeg dhumay oo lambarkiisu ahaa 499836 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Hargeysa kuna qorneyd lacag dhan Sh. So. 25.000/= uu iska lahaa Axmed Cusmaan Nuur sida ku cad warqadda lam. 002167 Taariikh 15-3.83 oo Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Hargeysa;

HADDUU ARKAY: Qod.69 Sharciga lam.2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg W. Lam. 499836 oo ku qoran magaca Axmed Cusmaan Nuur ayna ku jirto Sh. So. 25.000/=.

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta Hargeysa u beddelo Axmed Cusmaan Nuur Jeeg Wareega ee kor ku tilmaaman una sameyso mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horeysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho, 15.3.83

GUDDOOMIYAHA MGB

(Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax)

L. 69

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In J. Wareegga dhumay oo lambarkiisu ahaa 025466 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xis-Guud, kuna qorneyd lacag dhan Sh. So. 20.000/= uu iska lahaa Maxamed Cabdi Cabulle sida ku cad warqadda lam. 000750 taariikh 3.1.83 oo Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xis-Guud;

HADDUU ARKAY: Qod.69 Sharciga lam.2 ee 9.9-65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) J. Wareegga lam. 025466 oo ku qoran magaca Maxamed Cabdi Cabdulle ayna ku jirto lacag dhan Sh. So. 20.000/= .

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta Xis-Guud u beddelo Jeegga Wareega ee kor ku tilmaaman una sameyso mid la mid ah ka dib markey xa soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah eeJamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horeysa aan is-hortaag laga keenin

Muqdisho, 3.2.83

GUDDOOMIYAHA MGB

(Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax)

L. 69/bis

# OGEYSIIS SHIR SAAMILEY

## WARSHADDA KIIMIKADA SOOMAALIYEED (BAYL)

Waxaa dhammaan laysugu yeerayaa saamileyda Shariikadda Warshadda Kiimikada Soomaaliyeed (BAYL) inay ka soo qayb galaan shirka saamilayda caadiga ah ee lagu qaban doono xarunta Shariikadda Xamar saacaddu markay tahay 17/= ama shanta galabnimo, bisha Maajo 18keeda, 1983, hadduu shirku ku dhammaan waayana mar labaadka bisha Maajo 26keeda, 1983.- isku saacadda kor ku qoran.-

Saamilayda Shariikadda waxaa laga codsanayaa inay shan maalmood ka hor keenaan saamiyaasha ku qoran saldhigga Shariikadda ilaa iyo intii uu shirku ka dhammaado.-

ARRIMAHA DOODDA:

1) Oggolaadka dheellitirka xisaabaadka sannad-kii 1982;

2) Wixii kale ee soo raaca ama door la bido in laga doodo.-

Muqdisho, 21.2.1983

GUDOOMIYAHA MAAMULKA

L. 70

## OGEYSIIS SHIR SAAMILEY

WARSHADDA SAABUUNTA QUBEYSGA & MARISKA

Waxaa dhammaan laysugu yeerayaa saamileyda Shariikadda Warshadda Saabuunta Qubeyska iyo Mariska inay ka soo qayb galaan shirka saamilayda caadiga ah ee lagu qaban doono xarunta Shariikadda ee Xamar saacaddu markay tahay 17/= ama shanta galabnimo, bisha Maajo 8deeda, 1983, hadduu shirku dhammaan waayana mar labaadka bisha Maajo 15keeda 1983 isku saacadda kor ku qoran.-

Saamileyda Shariikadda waxaa laga codsanayaa inay shan maalmood ka hor keenaan saamiyaasha ku qoran, saldhigga shariikadda ilaa iyo intii uu shirku ka dhammaado. -

ARRIMAHA DOODDA:

1) Oggolaadka dheellitirka xisaabaadka sannadkii 1982;

2) Wixii kale ee soo raaca ama d[illegible] la bido in laga doodo.-

Muqdisho, 21-2.1983

GUDDIGA MAAMULKA

L. 71

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Buug Kayd dhumay oo lambarkiisu ahaa 875/83 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Labaad (2) kuna qorneyd lacag dhan Sh.So. 7.000/= uu iska lahaa Maxamed Shariif Xasan sida ku cad warqadda lam. ——— — — taariikh 19.3.83 oo Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta

HADDUU ARKAY: Qod-69 Sharciga lam.2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kayd lam. 875/83 oo ku qoran magaca Maxamed Shariif Xasan ayna ku jirto lacag dhan Sh.So. 7.000/=.

WUXUU FASAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta Labaad u beddelo Maxamed Shariif Xasan Cali Buugga Keydka, ee kor ku tilmaaman una sameyso mid lamid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed, haddiin inta ka horeysa aan wax is-hortaag laga keenin.

Muqdisho, 19.3.83

GUDDOOMIYAHA MGB

(Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax)

MAXKAMADDA GOBOLKA SH/HOOSE MARKA

GUDDOOMIYAHA MAX. G. SH/HOOSE

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Buugga Kaydka dhumay lam. yahay 712/7, lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Qoryooley, kuna qoran lacag dhan Sh. So. 18,084/= (Toban Siddeed kun Siddeedtan iyo Afar), ayna Leedahay Muslima Macallin Xasan, sida ku cad warqadda lam. yahay 0037, Taariikh 12.2.83, ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Q/Yooley;

HADDUU ARKAY: Qod.69 Sharciga lam.2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kayd lam. 712/7, oo ku qoran magaca Muslima Macallin Xasan, ayna ku jirto Sh. So. 18.084/=.

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Q/Yooley u beddelo Muslima Macallin Xasan Buugga Kaydka ee kor ku tilmaaman una sameyso mid la mid ah ka dib markay kasoo wareegto muddo aan ka yarayn 30 Maalmood Maalinta Go'aanka lagu Daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, haddii inta ka horreysa aan wax is-hortaag ah laga keenin.

Marka 21.2.83

GUDDOOMIYAHA MAX. G. SH/HOOSE

(Maxamed Kaynaan Warsame)

L. 73